

Mudane Madaxweyne Kuxigeen dood iyo falanqey dheer oo ku aadan culeyska diyaar garowga Tartanka Kubadda cagta oo na wada heysto daraadeed waxaan kadib isla go'aansanay Qodobada hoos ku qoran.

1. Waxaa si niyad sami ah looga wada aqbalay Dawlad-Goboleedka Jubbaland soo celinta gogoshii ay codsadeen taasoo horeyna loogu sharfay iyaddoo Wasaaraddu xiligaas ay tixgalineysay codsigooda, ayey Kismaayo kaga dhawaaqday **Wasiir Khadiija** kadibna kulankii Garoowe ayaa lagu wada ayiday ku dhawaaqidii Wasiirka.
2. Kulankan Waxaa looga mahadcelinayaa Dawlad-Goboleedka Jubbaland ogolaanshaha ka qayb galka Tartanka Kubadda Cagta meel kasta oo lagu qabto oo ay Wasaaraddu go'aamiso.
3. Waxaa kulanka lagu go'aansaday in Tartanka lagu qabto Gobolka Banaadir Magaalada Muqdisho Caasimada dalka.
4. Kulanka waxaa loogu mahadceliyey Guddoomiyaha Gobolka Banaadir ahna Duqa Magaalada Muqdisho **Mudane Taabit Cabdi Maxamed** aqbalaadii wakhtiga kooban uu ku aqbalay soo jeedinta Wasaaradda ee ku aadaneyd in tartanka lagu qabto Gobolka Banaadir iyadoo ay dhammaan xubnaha kalena ay kawada aqbaleen kuna ayideen Wasaaradda soo jeedinteeda.
5. Iyadoo laga ambaqaadayo Warmurtiyeedkii ka soo baxay shirweynihii qabanqaabada qabashada Tartanka Kubadda Cagta ee **17 -19 November 2017ka** Kismaayo Caasimada KMG ee Dawla-Goboleedka Jubbaland aad noogu daahfurtay Mudane Madaxweyne kuxigeen sida ku cadeyd jadwalka qabashada tartanka kubadda cagta ee Dawlad-Goboleeyada iyo Gobolka Banaadir wuxuu isu bedelay oo la isla wada qaatay lana wada go'aansaday in uu dhici doonaa sida soo socoto:-
  - **1da** ilaa **3da December 2017ka** in ay noqoto keenista iyo dejinta Wufuuda iyo Ciyaartoyda Dawlad - Goboleedyada.
  - **3da** ilaa **5ta December 2017** Diyaargarowga kooxaha ee Garoomada Kubadda Cagta ee Gobolka Banaadir (Banaadir Istaadiyam iyo Jaamacaha).